

Maxaa ilmahaygu u aadayaa barnaamijka Kindergarten-ka?



Macna weyn ayay ku fahidaa barashada sanadaha hore. Macne ayey u samaynaysaa ilmaha xagga waxbarashada, shaqada iyo nololaha. Waxa ku dhaca ilmaha sanadaha hore wuxuu saamayn ku yeellan karaa sida maskaxdu u korto.

Fiktooriya gudaheeda dawladu waxay siisaa ilma walba hal sano oo kindergarten ah. Tani badanaa waa sanada ka horaysa marka ilmuhu bilaabay dugsiga.

Barnaamijka kindergarten-ku wuxuu ka dhici karaa kindergartenka bulshada, daryeelka dhallaanka ama dugsiyada qaarkood. Dhamaan kindergartenadu waxay muujin doonaan shahaadada kindergartenka (arag lifaaqa) lana hadal baraha ilmanimada hore ee aqoonta u leh.

Macluumaad intaas ka badan

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan barnaamijka kindergartenka iyo adeegyada kale ee carruurta oo agagaarkaaga, la hadal dawlada hoose ama xafiiska Wasaarada Adeega Aadanaha. Waxaad kaloo heli kartaa macluumaad intaas ka badan adigoo la xiriiraya laanta adeegyada aadanaha ee Ilmanimada hore ee ku yaalla Xafiiska Carruurta telefoonka 1300 731 947 adigoo booqanaya websaytka Wasaarada Adeegyada Aadanaha oo ah:

www.dhs.vic.gov.au/earlychildhood

khibrad ballaaran

Barnaamijka kindergarten-ku wuxuu siin doonaa ilmahaaga khibrada badan oo xiriira ilmanimada. Khibraduhu waxay ka caawimaan ilmaha inay ka horumaraan oo bartaan waxyaalla badan. Dadka qaarkiis waxay ugu yeeraan midaan mudnaan siinta 'ilmaha oo dhan'. Barnaamijku wuxuu siin doonaa ilmahaaga khibrada aad u kala duwan. Waxyaallaha kale ka sokow, ilmahaagu wuxuu baran doonaa:

- inuu isticmaalo luqada
- la dhaqmo kuwa kaleeto
- kalsooni isku qabo
- sawiro, ranjiyeyo, heeso ama dhaansi cayaaro
- Inuu ogaado, sahmiyo oo xaliyo dhibaatooyin badan.

Ilmahaagu wuxuu wax ka baran doonaa wixii ku saabsan

- naftiisa, ama nafteeda
- dadka kale
- adduunka.

Ilmahaagu wuxuu kaloo baran doonaa xirfado wuxuuna heli doonaa macluumaad ka caawimi doona inuu noqdo akhriste iyo qore wanaagsan.

Barashada la joogida kuwa kale

Ilmahaagu wuxuu baran doonaa la qabsiga carruurta kale isagoo

- daryeelaya una naxariisanaya
- Iyagoo soo dhowaynaya dadka iyaga oo kale aan ahayn
- Iyagoo muujinaya dareenka dariiqooyinka wanaagsan
- Iyagoo caawimaya ama kuwa kale ka hellaya caawimo
- Iyagoo baranaya dariiqooyin wanaagsan oo wax lagaga qabto khilaafaadka
- La shaqaynaya kuwa kale si wax loo qabto.

Ilmaha shakhsiyad

Macalinka ilmanimada hore ayaa baranaya ilmahaaga. Ilmaha kale ayaa baran doona adiga iyo qoyskaaga, waxna ka baran doona dhaqankaaga iyo bulshada. Macalinku wuxuu ogaanaya ilmahaagu wuxuu ku fiican yahay, wuxuu xiisaynayo, wuxuu awooda u leeyahay yahay iyo baahidiisa. Ilmahaaga waxaa loo arki doonaa qof gaara ahaan oo aan cidna la mid ahayn.

Kaalamda waalidka

Waxaad heli doontaa fursada lagu ogaado waalidiinta. Waxaad la hadli kartaa macalinka waxaadna kaalmo uga heli kartaa walwal kasta oo aad ilmahaaga ka qabto. Ilmahaagu wuu ku fiicanayaa kindergartenka markaad u sheegto shaqaalaha waxaad rabto iyo sida aad ugu aragto ilmahaaga.

Kindergarten-ku wuxuu kaloo caawimaa wax ka qabashada haddii ilmo u baahan yahay caawima siyaada ah. Shaqaaluhu way ku caawimi karaan haddii aad ilmahaaga u rabto adeegyo kale, ama qoyskaaga iyo naftaada.

Dhowrida mustaqbilka

Carruurta badankeed ku jirta barnaamijyada kindergartenka waxay sanada soo socota bilaabi doonaan dugsiga. Kindergarten-ku wuxuu ka caawimi karaa in talaabada soo socota noqoto guul. Marka carruurta is hubaan waxbay ka qaban karaan xaallada. Adeegyo badan oo barnaamijyada kindergartenka waxay la shaqeeyaan dugsiyada agagaaraha si loo caawimo qoysaska carruurtuna si sahlan u galaan dugsiga.

Xafiiska Carruurta...caawimida qoysaska Fiktooriya waa inay siiyaan carruurtooda bilawga ugu fiican nololaha

Shahaadada Kindergarten-ka



Fiiri
shahaadadaan
markaad
dooranayso
kindergarten-
kaan ama
barnaamijka
daryeelka
ilmahaaga jira
afarta sano.

Kindergarten Certificate macneheedu waxa weeye barnaamijka kindergartenka ee adeega waxaa bixiya macalinka ilmanimada hore waxaana kharajkiisa bixiya Dawlada Dhexe. Iyadoo la ictiraafayo muhiimada ilmanimada hore dawlada dhexe waxay kharaj ku bixisaa ilma walbaa inuu hello hal ilmo oo kindergarten ah. Tani waa sanada ilmuhu dugsiga aadayo sanada ka horaysa.

Macluumaad intaas ka badan

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan barnaamijka kindergarten ee agtaada ah, kala xiriir dawlada dhexe websaytyada soo socda:

www.mav.asn.au/

www.vicnet.net.au/government/localgovt

Booqo websaytka ilmanimada hore oo ah – www.dhs.vic.gov.au/earlychildhood

ama wac Laanta Adeega Ilmanimada Hore ee Xafiiska Carruurta tel 1300 731 947 (qiimuhu waa inta halka aad joogto).